



Fadlan nagu soo biir xaflad si weyn loo soo agaasimayo oo loogu talagalay dugsiga sare ee cusub ee Lincoln High School

Dhawr toddobaad gudahood, dhismaha waxa ka bilaabmay dugsiga sare ee cusub ee Lincoln High School. Kaalay ku soo biir bulshada dabbaaldeeg si weyn loo soo agaasimay Sabtida, Diseembar 14, 10-ka ilaa duhurkii, bannaanka Lincoln ee ku yaal albaabka hoose ee dugsiga ee kafateeriyada. Lincoln wuxuu noqon doonaa dugsiga sare ee shanaad oo la casriyeeyay iyada oo ay sabab u tahay taageerada cod-bixiyaha oo gebi ahaanba dib ayaa loogu dhisi doonaa qaab dabaqyo badan oo isa saaran ah. [Halkan guji si aad u aragtid xaashida munaasabadda sida wayn loo soo agaasimay.](#)

Faahfaahinta dhismaha Lincoln

Lincoln iyo dugsiga sare ee Madison High School iyo dugsiga dhexe ee Kellogg Middle School dhamaantood waxaa maalgaliyey Curaarta Caafimaadka & Badbaadada iyo Casriyeynta ee May 2017. Benson Polytechnic, oo sidoo kale lagu daray curaartaas, waxay bilaabmi doontaa dhismehedu xagaaga 2021.

Dayrta 2022, dhismaha cusub ee dugsiga sare ee Lincoln High School wuxuu ka furmi doonaa dhinaca galbeed ee xarunta dhismaha hadda jira. Sanadka 2023, waddada cusub iyo garoonku waxay ka furmi doonaan barta uu hadda deggan yahay dugsiga hadda jiraa. Inta lagu gudajiro dhismaha cusub, ardaydu waxay ka sii wadan doonaan dhigashada dugsiga dhismaha Lincoln ee hadda. Shaqada dhismaha waxa loo samayn dayr kaasi oo siin doona ardayda iyo shaqaalaha be'ad badbaado leh. [Macluumaad dheeri ah, booqo websaytka dib-u-dhiska Lincoln.](#)

Xaflad loo wada dhan yahay

Dabbaaldegyadu waxay bilaabmayaan 10-ka aroornimo waxaana ku jiri doona mahadnaq dhuleed Ameerikaanka Dhaladka ah iyo dad hadal soo jeediya oo ay ku jiraan ardayda Lincoln, qaar kamid ah ardaydii hore oo la yaqaan iyo hoggaamiyeyaasha bulshada. Dabbaaldegyada iyo madadaalada ayaa sii socon doona subaxa hore oo ay ku jiraan booqashooyin xarunta ah. Munaasbadaha oo dhami waxay xurmeeyaan dhaqanka hodanka ah iyo bulshada dugsiga sare ee Lincoln High School, oo ah hoyga mufakiriinta adduunka ee hamuumta qaba ee ka shaqeeya adduun caddaalad badan, xaqsoor badan, oo xasilloon.

Soo-koobitaanka Dib u Dhiska Lincoln

Dib-u-dhiska Lincoln waxaa ka mid ah dhisme cusub oo dabaqyo badan ka kooban oo leh goobo faneed, meelo ardaydu ku kulmaan, xarun jimicsi oo la ballaariyey iyo fasallo casri ah. Waxaa jiri doona meel bannaan oo dhinaca ku haysa meelaha ardaydu ku kulmaan oo loogu talagalay hawlaha bannaanka iyo in lagu xiro xarunta xaafadaha ku hareereysan iyada oo loo marayo naqshadayn fiican meelaha lugta lagaga tallaabo waddada.

Wixii ku saabsan wixii ku soo kordha mashruuc socda, fadlan booqo websaytka Casriyeynta Lincoln ee ah <http://LincolnBond.pps.net>. [Halkan guji si aad u eegto xaashida xaqiiq oo kusaabsan mashruuca casriyeynta Lincoln.](#) | [Español](#) | [中文](#) Ku soo biir liiska emeyl u dirista LHSMoD@pps.net.

-David Mayne, Maareeyaha Xiriirka Curaarta